# Sharci siinta Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah Dhibku ku soo Gaaro

Immigration Relief for Victims of Family Violence

**Dagaalka qoyska dhexdiisa laga gaysto iyo galmada xooga ahi waa dambi United States. Haddii adiga ama qof kale oo qoyskaaga ah wax la yeelay, ama aad ka walwalsan tahay amaankaaga ama aadan amaan ahayn iyadoo sababtu tahay dagaal qoyska dhexdiisa ah, la xiriir hay'ada la yiraa Adeegyadda Maalinta Koowaad (Day One Services).**

Wac 1(866) 223-1111 ama dhambaal (text) u dir (612) 399-9995
Ama gal shabakada www.dayoneservices.org ama www.MNcasa.org

! Qaar badan oo ka mid ah foomamka USCIS waa ay isbedelayaan iminka! Ka eeg shabakada (USCIS website) si aad u hubiso in aad isticmaalayso foomkii ugu dambeeyey ka hor inta aadan waxba u dirin. Haddii aad u dirto foom khalad ah waxaa dhici karta inaad wax walba dib u bilowdo!

## Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah iyo Helida Sharci (Immigration)

La tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka hadii aad tahay dhibane ah dhib ka soo gaaray:

- Dagaal qoys dhexdii ka dhacay
- Galmo xoog ah
- Cadownimo dhanka caadifada ah
- fal hanjabaad ah
- noocyo kale oo fal tacadi ah



Waxaa dhici karta inaad hesho ama aad sii hagaajiso martabada sharcigaaga.

Sharciga Dagaalka ka dhanka Haweenka (VAWA) iyo sharciyo kale oo dowladda dhexe leedahay ayaa ka caawin kara dadka ah dhibanayaasha dhibka loo geysto ee ku nool Mareykanka (U.S.) inay sharci ka helaan laanta socdaalka. Marmarka qaarkood, dhibanayaashu waxa ay dalban karaan sharci, ogolaansho ay ku shaqeeyaan in la siiyo ama laga ilaaliyo masaafurin, la siiyo Sharci Degaansho Rasmi ah (green cards).

4 ta qaab ee badanaa ay dhibanayaasha tacadigu iyo kuwa dagaalka qoyska dhexdiisa ah ay uga helaan caawimaad laanta socdaalka waa:

- **Form I-360**, Arjiga Amerasiyaanka, Garoobka ama Muhaajiriinta Khaaska ah. Sidoo kalena la yiraa arjiga (VAWA), iskaa isugu xareyn ama arjiga xilaha lagu tacadiyo.

- **Form I-751**, Arjiga looga qaado shuruudaha Deganaanta. Sidoo kalena la yiraa arjiga saamixida (I-751).
- **Form I-918**, Arjiga Martabada U ee Muhaajirka. Sidoo kalena la yiraa fiisaha U ama arjiga martabada U.
- **Form I-589**, Codsiga Magangelyada iyo Ka Reebida Saarida.

Mid walba oo ka mid ah waxyaabahaa la kala dooran karo waxaa si faahfaahsan loogu falanqeeyey hoose.

Si aad u eegto mid walba oo ka mid ah foomamka looga hadlay warqadan xogta aruursan ah gal www.uscis.gov/forms. **Hel qareen kaa caawiya adiga xareynta mid walba oo ka mid ah foomamkan. Qareenku waa muhiim waayo kiisaskaasi waa kuwo dhib badan, haddii kiiskaaga aan la ansixinina waxaa lagu gelin karaa dhabada lagu rido dadka la saarayo (masaafurin).** Waxaa aad ka heli kartaa caawin ah helida qareen shabakada: https://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

## ➢ I-360 Arjiga (VAWA) ee (Arjiga Amerasiyaanka, Garoobka), ama Muhaajirka Khaaska ah)

Hadii uu kugu tacadiyey ama uu kugu tacadiyayo iminka qof qoyskaaga ka mid ah oo ah Muwaadiniinta Mareykanka (U.S.) ama leh Deganayaasho Rasmiga ah, waxaa dhici karta inaad awoodo inaad xareysato Arjiga la yiraa (I-360 VAWA). ). Arjiga I-360 VAWA (I-360 VAWA Petition) waxa uu ku siiyaa akhiyaarka ah helida sharci la'aanta caawimaada qofka ehelka ah ee muwaadinka Mareykana ah (U.S.) ama sharciga deganaanshaha ramsiga ah leh ee tacadi geystaha ah.

Hadii xiriirka aad la leedahay qof ku gumaysta ama kugu tacadiya ama hadii aad og tahay qof xaaladaa oo kale ku jira, arjiga (I-360 VAWA) waxaa dhici karta inuu idin caawiyo.

### Xaq u yeeladka




Si aad u xareysato Foomka (I-360), waa khasab inaad cadeyso in:

1. **Aad isqabtaan Muwaadin Mareykan ah (U.S.) ama qof Daganaansho Rasmi ah leh.** Ogow: waxa aad u baahan tahay inaad cadeyso inaad u guursatay qofka "xalaal ahaa." Taa macnaheedu waa waxa aad u baahan tahay inaad keento cadeyn ah inaadan u guursan qof kaliya ujeeda ah inaad sharci ku qaadato.

   **AMA**

   **Aad tahay ilmo uu dhalay Muwaadin Mareykan ah (U.S.) ama qof Daganaansho Rasmi ah** (iyadoo hadba ku xiran da'da iyo guur inuu jiro iyo in kale.)

   **AMA**

   **Aad waalid u tahay qof muwaadin Mareykan (U.S.) ah** (ilmaha muwaadinka ahi waa khasab inuu jiro 21 sanno ama ka weyn yahay.)

   **IYO**

2. **Aad tahay dhibane gumaysi iyo/ama tacadi** (jir, galmo, caadifad, dhaqaale) uu u gaystay qof qoyska ka mid ah oo muwaadin Mareykan (U.S.) ah ama Deganaansho Rasmi ah leh.

3. **Waxa aad la nooshahay ama aad la noolaan jiray Muwaadin Mareykan ah (U.S.) ama qof Daganaansho Rasmi ah leh.**
   **IYO**
4. **Aad tahay qof akhlaaq wanaagsan.** Ogow: waxyaabaha qaarkood, sida qaar ka mid ah dambiyada la isku helo waxa ay kaa hor istaagi karaan muujinta ah inaad tahay qof wanaagsan. Qareen arrintaada kala tasho si uu u eego xaaladaada.

Haddii aad xareysanayso dacwo ku salaysan tacadi uu kuu gaystay xilahaagu laakiin hadda aad is furteen qofkaa ama uu dhintay, waa khasab inaad xareysato codsigaaga ka hor inta uusan furiinka mudadiisii aysan ka soo wareegin 2 sanno, ama uu xilihaagu uu mootan yahay 2 sanno muddo ka yar.

Foomka I-360 waxaa dhici karta in laguu ansixiyo xataa hadii:

- Tacadigu uu dhacay dibada Mareykanka (U.S.)
- Xiriirkii labada qof uu dhmaaday iyadoo sababtu tahay geeri ama furiin 2-dii sanno ee la soo dhaafay
- Wali aad la nooshahay qofka aad isqabtaan ama qaraabada kugu tacadiya
- Qofka aad isqabtaan ee kugu tacadiyaa uu horey u wada qabi jiray xaasaska hal ka badan
- Xilaha tacadiga gaysta ama qaraabadiisu laga qaaday sharcigii 2 dii sanno ee la soo dhaafay gudahooda sababtoo ah tacadigii ay adiga kuu geysteen aadana dib u guursan

## Manfacyada

Xataa ka hor inta aan arjiga I-360 la ansaxin, waxaa dhici karta inaad hesho manfacyada dowladu bixiso sida, MFIP, MA, iyo cunto. Waxaa iyana sidoo kale dhici karta inaad hesho ruqso shaqo.

Haddii codsigaagga I-360 la ansaxiyo, adigu:

- Waxa aad "fal dib u dhigid." Taa macnaheedu waa laanta socdaalka ayaa kuu ogolaan inaad sii joogto Mareykanka (U.S.) aadna shaqeyso ayna kiiskaaga mudnaan hoose siiso marka ay noqoto wadanka ka saarida (masaafurin).
- Aad xaq u yeelato inaad codsato warqad shaqo.
- Ay dhici karto inaad xaq u yeelato inaad dalbato sharci Deganaasho Rasmi ah. La tasho qareen khidbad u leh sharciyada laanta socdaalka si aad u hubiso inaad xaq u leedahay ka hor xareynta.
- Ay dhici karto inaad awoodo inaad dalbato sharci ama martabad ay laanta socdaalku siiso qaar ka mid ah dad qoysaska.

Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan xareynta I-360 gal barta https://www.uscis.gov/i-360.

## ➢ Arjiga I-751 ee Ka Qaadidad Shuruudaha Sharciga Dehanaanshaha ah

Haddii aad guursato Muwaadin Mareykan ah (U.S.) ah ama sharci Deganaansho Rasmi ah leh, waxaa dhici karta inaad hesho Sharci Deganaansho ah oo ku salaysan guurkaa. Hadii guurkaagu 2 sanno ka yar jiro, waxaa lagu siin waxa la yiraa **Martabada Degnaanshaha ee Shuruuda leh** intii lagu siin lahaa Martabad Sharci Deganaansho ah oo rasmi ah. Kaarka Deganaanshaha Shuruudda lehi waxa uu shaqeeyaa **2 sanno** uun [marmarka qaarkoodna waxaa loogu yeeraa "sharciga labada sanno ah (green card)] **Martabada Degnaanshaha ee Shuruuda leh waa ay ka duwan tahay martabada Deganaanshaha ee Rasmiga ah**. Deganaanshaha rasmiga ahi ma uu dhaco, xataa haddii uu kaarku dhaco . Deganaanshaha Rasmiga ah waxa uu shaqeeyaa **10 sanno** waana la cusnoonaysiin karaa. Martabada Degnaanshaha ee Shuruuda leh waxa uu ku dhacaa 2 sanno waxa kaliya uuna sii jiri karaa iyadoo la xareysto foomka I-751.

Si aad ugu bedesho martabada Deganaansha Shuruuda leh, martabad Degnaansho oo Rasmi ah xaree Foomka I-1751 (Form I-751), Codsiga looga Qaadayo Shuruudaha Deganaanshaha. **Ogow:** Deganayaasha Shuruudaha lahi waa INAYSAN xareysan foomka I-90 kaa oo loo adeegsado in lagu cusboonaysiiyo iyo in lagu bedelo kaararka Deganaanshaha Rasmiga ah. Haddii wali uu guur jiro, uuna xilahaagu uu yahay mid amaan ah oo diyaar ah, 2 labadiinu waa inaad wadajir u wada xareysataan foomka I-751. Waxa aad u baahan tihiin inaad arrintan sameysaan 90-cisho ka hor taariikhda dhicida kaarkaaga Deganaanshaha ee Shuruudalaha leh.

Laakiin, haddii xilahaagu uu yahay tacadiye ama xasad kuu daran yahay, ama haddii aad is furteen, waxa aad xareysan kartaa kaliyaa Foomka I-751 (Form I-751). Haddii aad kaligaa xareysanayso, uma baahnid inaad sugto ilaa 90-cisho ka hor inta aan kaarku dhicin. Waxa aad xareysan kartaa mar aad uga sii horeeysa taa. Waxaa fiican inaad xareysato inta aan kaarku dhicin, laakiin waxaa dhici karta inaad awoodo inaad xareysato ka dib kolka kaarkaaga Deganaanshaha ee Shuruudlaha ahi uu dhaco. **Xusuusnow uun, martabadaaddu waxa ay dhici kolka kaarka Deganaanshaha Shuruudlaha ahi uu dhaco.** Kolkaa, haddii aadan xareysan I – 751 ka hor inta aan kaarku dhicin, waxaa lagu gelin karaa wadadda dadka laga saarayo ama waxaa lagu geyn karaa maxkamad laanta socdaalku leedahay.

## Xaq u yeeladka



Hadii aad kaligaa aad xareysay Foomka I-751 by sababtoo ah dagaal qoyska dhexdiisa ah ama xaqdi dhanka caadifada ah, waa inaad cadeyso:

1. In guurkaagu uu sax iyo sharciba ahaa.

2. Guurkaagu inuu "xalaal ahaa." Taa macnaheedu waa waxa aad u baahan tahay inaad keento cadeyn ah inaadan u guursan qof kaliya ujeeda ah inaad sharci ku qaadato.

3. Tacadi ama xaasidnimo ba'an oo uu geysto xilahaagu.

Waxaa jira sababo kale oo aad u xareyn karto Foomka I-751 (Form I-751) kaligaa. Haddii aad xilihii kale is furteen ama xilihaagii uu dhintay ama haddii aad ku noqonayso wadankaagii aad u dhalatay in aad la kulmi doontid qaxar aad u badan. Xaaladdaha caykaa ah marka ay jiraan, haddii sidoo kale lagugu tacadiyey waxaad kaloo u baahan tahay inaad keento cadeyn tacadigaa ah.

## Manfacyada

Haddii Foomkaaga I-751 (Form I-751) loo ansaxiyo tacadi awgii ama xaasidnimo awgeed, uuna xilahaaga tacadi gaystaha ahi uu yahay muwaadin mareykan (U.S.) ah, waxa aad heli kartaa:

- Sharci Daganaansho Rasmi ah
- Fursad aad ku codsato muwaadinimo 3-sanno

Hadii codsigaaga I-751 loo ansaxiyo sababo kale awgood, waxa aad heli:

- Sharci Daganaansho Rasmi ah
- Fursad aad ku codsato muwaadinimo 5-sanno

**Ogow:** Inta hawsha codsigaagu socoto, waxaa tahay qof wadanka degan. Waa aad socdaali kartaa, waa aad shaqeysan kartaa waana laguu xisaabin waqtigaa kolkaa aad muwaadinka noqonayso. Haddii aad rabo inaad u safarto dibadda Mareykanka (U.S.), kala tasho qareen khataraha suurtagal ah ee aad la kulm karto.

Wixii akhbaar ah ee dheeraad ah ee ku saabsan xareysiga I-751 gal oo ka eeg barta https://www.uscis.gov/i-751

## ➢ Martabada U ee Muhaajirka Aan Soo Guurin ee I-918 ama Fiisaha U

Martabada fiisaha U waxaa la siiyaa dadka dhibanayaasha ah ee loo gaysto dambiyada qaarkood, oo ay ku jiraan kufsiga, weerar hub khatar ah loo adeegsado, dagaalka qoyska dhexdiisa ka dhaca iyo tacadiga ilmaha. Ma aha inaad guursato qof wax ku yeelaya adiga si aad u awoodo inaad hesho sharcigan.

Kiisaska intooda badan, waa inaad la shaqeysaa bilayska, xeer-ilaaliyeyaasha, ama baarayaasha dambiga, si kolkaa aad u hesho foom shahaado ah oo cadeynaya inaad caawinayso baaritaanka ama maxkamadeynta dambiga. Kolkaa waxa aad xareysan kartaa codsi U ah. Ma quseeyso tani in qofka waxyeeladda kuu geystay la xiro, maxkamad la hor keeno ama dambiga lagu helo. Soo sheegida dambiga iyo caawinta baaritaanka ama maxkamadeynta ayaa ku filan inaad awoodo inaad codsato fiisha U (U visa).

Eeg Warqadayada Xogta Aruursan ee *Dhibayaasha Dambiyada iyo "Fiisaha U"*.

**Ogow:** sharciga uu wadanka ku leeyahay qofka geystay dambigu ma saameyso xaq u yeeladkaaga fiisaha U.



## Xaq u yeeladka

Waa aad codsan kartaa martabada U hadii:

1. **Aad tahay dhibanaha toos ah ee dambiga xaqqa u leh fiisaha, sida dagaalka qoyska dhexdiisa ka dhaca.**

   **AMA**

**Waxaa dhici karta inaad u codsan karto "dhibane dadban"** ahaan ee dambiga xaqqa u leh. Tusaale ahaan, hadii ilmahaagu uu ahaa dhibane dambi loo gaystay aadna u soo sheegtay dambiga bilayska, kolkaa waxaa dhici karta inaad awoodo inaad codsato fiisaha U adigoo ah dhibane dadban oo dambi laga galay. Tusaalahan, ilmahaaga ayaa ah dhibanaha tooska ah adiguna waxa aad tahay dhibanaha dadban waayo waxa aad tahay waalidka ilmaha.

**IYO**

2. **Uu kuu soo gaaray tacadi weyn oo jirka ama caadifa ah sababta oo ah dambiga**

**IYO**

3. **Aad caawisay ama caawin doonto baaritaanka iyo/ama maxkamadeynta dambiga.** Tusaale ahaan, waxa aad wacday bilayska, aadna siisay oraah, waxa aad siisay akhbaar xeer-ilaaliye ama maxkamad, ama waxa aad makhraati ka furtay maxkamad kolkaa waxaad caawisay baaritaanka ama maxkamadeynta dambiga.

**IYO**

4. **Laguu ogol yahay Mareykanka (U.S.)** Qaar ma mid ah fal-dambiyeedda, jabinta sharciyadda laanta socdaal, ama arrimo kale ayaa waxaa dhici karta in macnaheedu yahay in aan laguu ogolayn in aad wadanka soo gasha. Laakiin waxaa jira saamixid aad codsan karto si aad u waydiisato laanta socdaalka inay ku cafiso adiga ayna kuu ogolaato inaad hesho fiisaka U (U visa). Qareen khibrad u leh sharciyadda laanta socdaalka ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato haddii aad u baahan tahay inaad xareysato saamaxaad.

## Manfacyada

Haddii Martabadaadda U ee qofka aan wadankan u soo wada guurin la ansaxiyo, adigu:

- Waxa aad heli kartaa 4 years oo martabadda "fiisaha U" "(U visa)" ah.
- Waxa aad heli kartaa warqad shaqo oo 4 sanno ah.
- Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato inaad codsato martabadda Deganaanshaha Rasmiga 3 sanno ka dib kolka aad haysato "fiisaha U" "(U visa)" ah.
- Waxaa dhici karta inaad ka caawiso qaar ka mid qoyskaaga ee xaqqa u leh sharci helid iyo inay dalbadaan sharcigaa. Xataa hadii aadan u dalbin dadkaa ehelkaaga sharciga markiiba, waxaa dhici karta inaad awoodo inaad caawiso ha dhow.

**Ogow:** Inta hawsha codsiga fiisaha U (U visa) ay ka socoto laanta socdaalka, waxaa laga yaabaa inaad hesho fal dib u dhigid. Taa macnaheedu waa laanta socdaalka ayaa kuu ogolaan inaad sii joogto Mareykanka (U.S.) aadna shaqeyso ayna kiiskaaga mudnaan hoose siiyo marka ay noqoto wadanka ka saarida (masaafurin). Tani waa caawin fiican waayo waxa ay qaadataa sannado badan inaad hesho go'aan ku saabsan kiiskaaaga fiisaha U (U visa) ah. Waa aad ka arki kartaa inta ay le'eg tahay mudadda ay qaadanayso inaad hesho go'aano shabakadda (USCIS website).

Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan xareysiga I-918 gal barta https://www.uscis.gov/I-918.

## ➢ Foomka I-589, Codsiga Megangelyada iyo Ka Reebida Saarida

Megangelyada iyo Ka Reebida Saarida waxaa heli kara ciddii:

- Horey loogu ciqaabay wadanka ay u dhasheen AMA
- Ka cabsi qabta in lagu ciwaabi doono wadanka ay u dhasheen mustaqbalka hadii ay khasab ku noqoto inay ku noqdaan wadanka ah u dhasheen, IYO hadii cabsiduna ay tahay wax jira oo dhab ku salaysan.

Taa machadeedu waa in qofka jaa horey ay u gaartay waxyeelo aad u ba'an ama hanjabaad waxyeelid ah oo dhab ah horey loogu habjabay intii uu wadankiisa joogay AMA inay u badan tahay inay waxyeelo weyn loo geysan ama lagu dili mustaqbalka wadankiisa hadii uu ku noqdo.


**Kiisaska qaarkood, dagaalka qoysaska dhexdooda ah ee ka dhaca qofka wadankiisa uu dhashay waxaa lagu siin karaa sharci Megangelyo ama looga Reebi Saarida.** Kiisaska ku salaysan dagaalka qoyska dhexdiisa ahi waa dhib badnaan karaan! Hadii xaaladan oo kale ay adiga ku haysato la tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka.

**Ogow:** si aad xaq ugu yeelato Magangeliyo, waa khasab inaad uga xareysato foomka I-589 dowlada **hal sanno gudaheed** maalinta aad soo gashay wadanka United States.
Waxaa jira shuruudo kooban oo ka reebid ah oo ku soo aroora arrintaa.

**Ogow:** Hadii codsigaaga megangelyada aan la ansaxin, waxaa loo gudbin xaakim laanta socdaalka (immigration) ka tirsan. Aad bay u adag tahay in lagu guulaysto kiis megangelyo ku saabsan la'aanta qareen.

Wixii akhbaar ah ee ku saabsan xareyta I-589, gal www.uscis.gov/i-589.

## Lambaro Telefano Muhiim ah



- Ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529
  - Haddii aadan amaan ahayn waayo dagaal qoyska dhexdiisa ah:
    - Hennepin county: Domestic Abuse Center (Rugta Adeega Tacadiga Qoyska Dhexdiisa) ah: 612-348-5073 https://www.hennepinattorney.org/get-help/crime/domestic-abuse-service-center
    - Statewide - Day One Services: 1(866) 223-1111 or text (612) 399-9995 www.dayoneservices.org

- Minnesota 2-1-1: ka wac gobolka oo dhan, dhambaal (text) ugu dir ziibkoodkaaha lambarka ah 898-211 ama kula hadal khadka (online) ka ee ah www.211unitedway.org


- Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

## DIGNIIN

Aad iyo aad u taxadar ka hor intaa aadan u gudbin codsi laanta socdaalka. Marmarka qaarkood, hadii codsigaaga la diido, waxaa lagu gelin karaa hanaanka dadka la masaafurinayo**.** Hadii aad horey u gaysatay dambiyada qaarkood ama aad been u sheegtay dowlada ama waxyaabo kale waxaa sidoo kale lagu gelin karaa hanaanka dadka la masaafurinayo. XUSUUSNOW: Laanta socdaalku waxa ay eegi kartaa DHAMAAN taariikhdaada oo dhan.

**Ka hel caawimaad qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka. Qareenku waxa uu kaa caawin karaa inuu hubiyo in wax walbaa hagaagsan yihiin!**

Si aad uga hesho caawimaad meel kuu dhow gal [www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics](http://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics)



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**